

**REPUBLIC OF**



**SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

REF. JSL/M/XERM/249-1598/022013

DATE 19/02/13

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0304/022013**

**Dhaqan-galka Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada  
Xeer Lr. 61/2013**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-20/588/2013 ee ku taariikhaysan 16/02/2013 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013 ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

*AMM*  
Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



RL: 15  
RECEIVED  
20/02/2013

Jamhuuriyada Somaliland

Golaha Wakiilada  
Xafiiska Xoghayaha Guud

Ref :- GW/G/KF/48/2013



Republic of Somaliland

House of Representatives  
General Secretary Office

Date 17/02/2013

**Ku: - Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland.**

**Ujeedo: - Soo Gudbin Go'aanka Ansixinta Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada (Xeer Lr: 61/2013)**

**Mudane Madaxweyne,**

Waxa aan si sharaf iyo qadarin leh halkan kuugu soo gudbinaynaa nuqulada Go'aanka ansixinta ee Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada (Xeer Lr. 61/2013)

1. Go'aan Lr. GW/G/KF-20/588/2013

**ALLAA MAHADLEH**

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiiladda JSK  
C/risaaq Siciid Ayaanle.





Ref: GUW/G/KF-20/588/2013

Date: 16/02/2013

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada**  
**Xeer Lr.61/2013**

- Markuu Arkay** Qodobadda 54aad iyo 14aad oo si cad u qeexaya awooda jidaynta takaaliifta ee Golaha Wakiilada iyo in curinta takaaliifta ay lagama maarmaan tahay in uu xeer jideeyo
- Markuu Tixgeliyay:-** Baahidda weyn ee loo qabo in kor loo qaado heerka amaanka iyo sumcadda Madaarada Somaliland, taas oo dhabadda u xaadhi karta in ay dhaqaalaha Dalka kobciso, isla markaana dhiirigeliso arimaha dalxiiska, maalgashiga shisheeye, iyo ka ganacsiga hawada Somaliland.
- Markuu garwaaqsaday:-** In ay lagama maarmaan tahay in lays waafajiyo xeerarka caalamiga ah ee duulista hawada (1944 Chicago Convention) iyo xeerarka dalka ee duulista hawada si loo helo xeer hufan oo si mug leh u eegaya duruuftena tixgalina siinaya xeerarka caalamiga ah, si dhabada loogu xaadho dhismaha **Hay'adda Duulista Hawada Somaliland (Somaliland Civil Aviation Authority)**.
- Markuu Garawsaday: -** In aanay suurtagal ahayn duruufta hadda in kharashyada kala du-duwan ee ku baxaya adeegga qalabka lagu baadho shandadaha iyo Dadkaba laga dabooli karo Miisaaniyadda Qaranka ee 2013.
- Markuu Dersay:-** Warbixintii Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada iyo dhamaanba Takaaliifta iyo cashuuraha laga qaado Madaarada Somaliland

Markuu u Codeyay :

Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013 Kal-fadhigii 20<sup>aad</sup> fadhigiisii 24<sup>aad</sup> taariikhduna ku suntanayd 2/02/2013 oo ay goob joog ahaayeen (50) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

### WUXUU

Cod aqlabiyadd ah oo afartan iyo lix mudane (46 cod) oo gacan taag ah ku Ansixiyay Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada (Xeer Lr. 61/2013), halka laba (2) mudane ka diideen, hal mudanena ka aamusay Gudoomiyuhuna muu codayn sida caaddada ah.


### ALLAA MAHAD LEH



C/risaaq Siciid Agaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada




Md Bashe Maxamed Farax  
Gudoomiye-ku-xigeenka 1aad ee G/Wakiilada



---

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**  
**GOLAHA WAKIILADA**



---

**Xeerka Takaaliifta Amniga**  
**Madaarada**

**(XEER LAMBAR 61/2013)**



## GOLAHA WAKIILADA JSL

|                              |  |
|------------------------------|--|
| <b>Markuu Arkay</b>          | Qodobadda 54aad iyo 14aad oo si cad u qeexaya awooda jidaynta takaaliifta ee Golaha Wakiilada iyo in curinta takaaliifta ay lagama maarmaan tahay in uu xeer jideeyo   |
| <b>Markuu Tixgeliyay:-</b>   | Baahidda weyn ee loo qabo in kor loo qaado heerka amaanka iyo sumcadda Madaarada Somaliland, taas oo dhabadda u xaadhi karta in ay dhaqaalaha Dalka kobciso, isla markaana dhiirigeliso arimaha dalxiiska, maalgashiga shisheeye, iyo ka ganacsiga hawada Somaliland.  |
| <b>Markuu garwaaqsaday:-</b> | In ay lagama maarmaan tahay in lays waafajiyo xeerarka caalamiga ah ee duulista hawada (1944 Chicago Convention) iyo xeerarka dalka ee duulista hawada si loo helo xeer hufan oo si mug leh u eegaya duruuftena tixgalina siinaya xeerarka caalamiga ah, si dhabada loogu xaadho dhismaha <b>Hay'adda Duulista Hawada Somaliland (Somaliland Civil Aviation Authority)</b> . |
| <b>Markuu Garawsaday: -</b>  | In aanay suurtagal ahayn duruufta hadda in kharashyada kala du-duwan ee ku baxaya adeegga qalabka lagu baadho shandadaha iyo Dadkaba laga dabooli karo Miisaaniyadda Qaranka ee 2013.  |
| <b>Markuu Dersay:-</b>       | Warbixintii Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada iyo dhamaanba Takaaliifta iyo cashuuraha laga qaado Madaarada Somaliland  |

## **Wuxuu**

### **Ansixiyay Xeerka Takaaliifta Amniga Madaaradda JSL (Xeer Lr 61/2013)**

1



### **Qodobka 1<sup>aad</sup>**

#### **Eray Bixinta**

Hadaan si kale loo sheegin waxaa loo jeedaa macnaha erayada Xeerka dhexdiisa sidan:

**Xeer:-** Xeer waxaa loola jeedaa Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada.

**Takaaliif:-** Waxa loola jeedaa waajibaadka maaliyadeed ee xeerkani jideeyey.

**Wasiir:-** Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Duulista Hawada

**Socoto:-** Waxa uu xeerkani u aqoonsan yahay ruux kasta oo ka dhoofaaya Madaarada Dalka Jsl.

### **Qodobka 2<sup>aad</sup>**

#### **Magaca Xeerka**

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa **Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada JSL.**

### **Qodobka 3<sup>aad</sup>**

#### **Xadka Dabaqaada Xeerka**

Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa socotada ka dhoofaysa Madaarada Dalka.

### **Qodka 4<sup>aad</sup>**

#### **Takaaliif**

Waxaa ku waajib ah dhoofe kasta oo sita tigidh diyaaradeed, isla markaana leh kursi iyo miisaan u gaar ah in uu bixiyo takaaliif lacageed oo dhan (\$10) toban dollar.

### **Qodobka 5<sup>aad</sup>**

#### **Gacan Ku Haynta Adeegyada iyo Ururinta Takaaliifta**

1. Gacan ku haynta Ururinta Takaaliifta iyo adeega amniga Madaarada ee la xidhiidha qalabka lagu baadho shandadaha, Shaqaalaha iyo socotada waxaa ka mas'uul ah Xukuumadda, waxaanay u igman kartaa cidii ay u garato ee ku habboon.



2. Waxa la dhisayaa **Hay'adda Duulista Hawada** (Somaliland Civil Aviation Authority, SCAA) oo u xilsaaran maamulka iyo maaraynta duulimaadyada hawada Somaliland, taasi oo la wareegi doonta adeegyada Madaarada iyo ururinta Takaaliifta Xeerku jideeyey.

**Qodobka 6aad**  
**Ururinta iyo Qaab-xisaabeedka Takaaliifta.**

1. Ururinta iyo qaab-xisaabeedka takaaliifta, waxaa loo raacayaa xeerarka maaliyada ee Dalka.
2. Habka bixinta kharashaadka waxaa jaangoynaya Wasaaradda Maaliyadda, Wasaarada Duulista iyo Hawada iyo shirkada gacanta ku haysa.

**Qodobka 7aad**  
**Awoodaha Hanta Dhawraha Guud ee Qaranka**

Iyada oo aan waxba loo dhimayn awoodaha Hanti-dhawraha Guud ee ku xusan Xeerka hanti-dhawrka Guud iyo kuwa kale ee xeerarka Dalku jideeyeen, Hanti-dhawraha Guud wuxuu awood u leeyahay baadhista iyo dabagalka takaaliiftan.

**Qodobka 8aad**  
**Xeer-nidaamiyaha Xeerkan**

Wasiirka ayaa awood u leh inuu soo saaro Xeer-nidaamiye aan ka hor imanayn Xeerkan.

**Qodobka 9aad**  
**Dhaqan-galka Xeerka.**

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, Madaxweynuhuna saxeexo, isla markaana lagu baahiyo faafinta rasmiga ah.

  
**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

  
**Baashe Maxamed Faarax**  
Gud Ku-xigeenka 1<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada JSL.